

## **SAFMAREENKA COVID-19 DAAWEYNTA ILKAHA FOOMKA OGEYSIIS IYO AQOONSIGA HALISTA**

Hadafkeenu waa inaan u fidino jawi amaan bukaannadeena iyo shaqaalaheena, iyo inaan horumarino amniga bulshada deegaanka. Dukumiintigaan wuxuu kuu tilmaamayaa macluumaad aan kaa codsaneyno inaad aqoonsato oo aad fahanto arrimaha ku saabsan fayraska COVID-19.

Fayraska 'COVID-19' waa cudur halis ah oo aad u faafa. Ururka Caafimaadka Adduunka ayaa u aqoonsaday inuu yahay masiibo. Wuxuu ka qadi kartaa COVID-19 ilo kala duwan. Meheradeenna waxay doonaysaa inay hubiso inaad ka warqabto halista dheeraadka ah ee qaadista COVID-19 ee la xiriira daryeelka ilkaha.

Fayraska 'COVID-19' wuxuu leeyahay waqtii dheer soo muuqashadiisa. Adiga ama bixiyeyaashaada daryeelka caafimaadka waxaa laga yaabaa inaad qabtiin fayraska oo aadan muujin astaamo walina si sare aad u faafisaan. Go'aaminta qofka uu ku dhaco COVID-19 waa mid dhib badan oo wareer badan sababtoo ah helitaanka qalabka baaritaanka viruska oo xadidan.

Sababtoo ah soo noqnoqoshada iyo waqtiga booqashooyinka bukaanada kale ee ilkaha, astaamaha fayraska, iyo astaamaha hababka daaweynta ilkaha, waxaa jira khatar sare oo ah inaad si fudud u qaado viruska adoo jooga xafiiska ilkaha.

Nidaamka ilkuhu wuxuu abuuraa buufin biyo taas oo ah hal dariiqa cudurku ku faafo. Dabeecadda aadka u wanaagsan ee lagu buufiyo biyaha ayaa ku sii nagaan kara hawada muddo dheer, taas oo u oggolaanaysa in fayraska COVID-19 u gudbo kuwa ku dhow.

Ma ku xiran kartid afkaaga maaskarada difaaca si looga hortago faafitaanka inta lagu jiro daaweynta maadaama bixiyeyaashaada daryeelka caafimaad ay u baahan yihiin marin u helida afkaaga si ay u bixiyaan daryeel. Tani waxay kaa dhigeysaan inaad u nuglaato gudbinta COVID-19 inta aad qaadaneysa daaweynta ilkaha.

Waxaan xaqijinayaa in aan aqriyay Ogeysiiska kor ku xusan isla markaana aan fahmay oo aan aqbalay in ay jirto halista sii kordheysa ee ah in aan la qaado fayraska COVID-19 gudaha xafiiska ilkaha ama daaweynta ilkaha. Waxaan sii xaqijinayaa inaan fahamsanahay oo aan aqbalayo halista dheeraadka ah ee qaadista COVID-19 la xiriirida xafiiskan. Waxaan sidoo kale qirayaa inaan ka qaadi karo fayraska 'COVID-19' bannaanka xafiiskan oo aan la xiriirin booqashadeyda halkan.

Waan akhriyay oo fahmay macluumaadka kor lagu sheegay: